



# Macluumaad Muhiim ah Oo Kusaabsan Cuntooyinka PPS ee Dayta

19 ka Ogosto, 2020

Qoysaska PPS ee Sharafta leh,

Sidaynu ognahay, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay ku bilaabi sanad dugsiyeedka Waxbarashada Onlaynka ah oo Dhammaystiran ilaa ugu dhawaan 5 ta Noofambar (ka fiiri [pps.net/fall2020](https://pps.net/fall2020) tafaasiil dheeraad ah). Waaxda Adeegyada Nafaqadu waxay sii wadi inay goobta ku bixiso cuntada. Wuxuu qorshayaashayada siinta cuntooyinka ee ardayda inta wakhtigan lagu jiro.

**Adeeggayaga cuntada xagaagu wuxuu dhammaanayaa Khamiista, 20 ka Ogost, waxaananu dib u bilaabi doonaa adeegga cuntada maalinta koowaad ee sanadka dugsiyeedka cusub, Arbacada, 2 da Sibtambar:**

- **Goobta:** Cuntooyin dibadda loo qaato waxa laga heli doonaa 38 dugsi. [Dhagsii halkan](#) si aad u aragto liiska dhammaystiran ee dugsiyada/goobaha.
- **Goorta:** Isniinaha iyo Arbacooyinka, 3 ilaa 5 g.d.
- **Faahfaahin kale:** Ardaydu waxay heli doonaan cuntada shan maalmood toddobaad kasta. Isniinta, waxay heli doonaan quraacda iyo qadada Isniinta iyo Salaasada; Arbacada, waxay heli doonaan cuntooyinka Arbacada, Khamiista iyo Jimcaha.

Qoysaska aan u dhawayn meel cuntada laga qaato ama u baahan kaalmo inay cuntada helaan, waxaanu siin doonaa adeegyo dheeraad ah: **gaynta guriga cuntooyinka dugsiga**. Adeegyada Cuntadu waxay kaashan Gaadiidka PPS si toos guryaha loogu geeyo quraacaha iyo qadooyinka. Haddii aad jeelaan lahayd in cuntada guriga laguugu keeno, fadlan buuxi [foomkan onlaynka ah](#). Fadlan ogow in keenista cuntadu ay kala duwanaan karto iyadoo kusalaysan tirada codsiyada, oo keenis kastana ay kujiri karto cunto dhawr maalmood loogu talogalay.

Qaadista iyo gaynta cuntooyinka dugsigu waxay u noqon doonaa bilaash kuwa u qalma cuntada bilaashka ah ama qiime dhimista lagu sameeyey, ama arday kasta oo dhigta dugsi ah Community Eligibility Provision (CEP) (ka fiiri [web-beejka Adeegga Nafaqada Bilaashka ama Qiime Dhimista leh](#) macluumaadka mutaysiga).

Qoysaska aan mutaysan cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista leh, quraac kasta waxa laga siin \$1.50, qado kastana waxa laga siin \$2.90. Qoysasku waa inay dalbadaan sanad dugsiyeed kasta cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista leh, waxayna dalban karaa markay doonaan sanad



dugsiyedka.

Waxaanu hayn doonaa macloomaad badan oo tan kusaabsan, iyo waliba liiska ugu dambeeyey ee dugsiyada CEP ee 2020-21, maalmaha soo socda. Haddii aad qabto su'aalo, fadlan la xiriir [nutritionservices@pps.net](mailto:nutritionservices@pps.net) ama wac 503-916-3399.

Waxaanu rajaynaynaa inaanu sii wadno u adeegidda ardaydiina sanad dugsiyedkan soo socda!

Adeegyada Nafaqada PPS